# Waxaan u baahanahay taageeradaada!

## ...waan kuu magdhabi doonaa wakhtigaaga.

**Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020"** waa dadaal wadajira oo ay wadaan haya'ada aan faa'iido doonka ahayn ee IRCO, Latino Network, Adeega Qoyska ee Magaalada (Metropolitan Family Service), NAYA Family Center iyo SEI oo culayska lagu saarayo ka shaqaynta kordhinta natiijooyinka tacliimeed ee ardayda midabyada kale duwan leh iyadoo la maamuusayo sidoo kalena aqoonsiga dhaqanka la xiriira iyo nidaamyada jira lagu darayo barnaamijyada.

Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020" wuxuu iskaashi la yeelanayaa **Dugsiga Degmada David Douglas** si loo dhiirigeliyo jawi wanaagsan oo dugsigu yeesho sidoo kalena loo xaqiijiyo in ardayda midabyada kale duwan leh ee ka qalin jebiya dugsiga sare ay diyaar ugu noqon lahaayeen jaamacad iyo shaqo.

United Way of the Columbia-Willamette ayaa hay'adahan aan faa'iido doonka ahayn iyo dugsiyadan kala shaqaynaya sidii ay ogaan lahaayeen waxyaalo dheeraad ah oo ku saabsan sida barnaamijyadoodu u caawiyaan ardayda marka dugsiga la joogo iyo marka laga maqan yahay. Si aad waxyaalo dheeraad ah uga ogaato waayo aragnimada ay ardayda iyo waalidiinta/daryeelayaashu ka heleen barnaamijyadani, waxaan jeclaan lahayn oggolaanshahaaga si loo helo xogta tacliimeed ee ku saabsan carruurta iyo dhallinyarada ka tirsan barnaamijyadan.

Waxaan soo ururin doonaa xog iyada oo la adeegsanayo Adeega Waxbarashada Degmada ee Degaanka Multnomah ee sanad dugsiyeedka 2016-2017-ka, 2017-2018-ka, iyo 2018-2019-ka loogu talagalay ardayda Dugsiga Hoose ee Earl Boyles, Dugsiga Hoose ee Mill Park, Dugsiga Dhexe ee Ron Russell, Dugsiga Sare ee David Douglas.

Bixinta xogta tacliimeed ee ardayga iyo dugsiga waajib maaha. Haddii aad jeclaan lahay in aad na caawiso, fadlan saxiix foomka ogolaanshaha ee la socda xirmadan.

**WAAD KU MAHADSANTAHAY WAQTIGAAGA!**

# Guudmarka Ogolaanshaha

**Boggaga soo socdaa waxay sharaxaad ka bixinayaan ogolaanshaha ay waalidiinta, daryeelayaasha iyo ardaydu bixinayaan. Haddii aad ku raacsan tahay, saxiix bogga u dambeeya ee Foomka Ogolaanshaha.**

**Marka waalidka/daryeeluhu saxiixaan foomkan, waxaad:**

- ☐ **Noo ogolaanaysaa (adeeg bixiyayaasha iyo qiimeeyayaasha) in aan eegno sidoo kalena isticmaalno diiwaannadaada ardaynimo sida, imaanshaha dugsiga, xeerarka waxbarasho, credit-ka, anshaxa iyo qalin jebinta**

- ☐ **Na siinaysaa ogolaansho aan ku isticmaali karno diiwaannada barnaamijka/adeega la iska kaashanayo ee Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020" ee laga yaabo in ay kaa hayaan (arday ahaan iyo/ama qoys ahaan) si aad nooga caawisaan in aan si fiican u fahano waayo aragnimada aad hesheen**

- ☐ **Fahamsan tahay in macluumaadka shakhsi ee la bixiyo ee (arday ama waalid) aan la wadaagi doonin oo aanay noqon doonin kuwo la wada arko sidoo kalena aan lala wadaagi doonin macalimiinta, shaqaalaha dugsiga ama waalidiinta kale**

- ☐ **Na siinaysaa ogolaansho (adeeg bixiyayaasha iyo qiimeeyayaasha) si ay sawirrada iyo cajaladaha fiidiyoowga ee ardayda iyo/ama waalidiinta/daryeelayaasha ugu isticmaali karaan waxyaabaha xayaysiiska ah**

- ☐ **Fahamsan tahay in wadaagida xogta tacliimeed ee ardayga ay tahay mid ikhtiyaari ah, oo aad joojin karto wakhti kasta adiga oo Alejandro Queral kala xiriiraya 503-226-9357**

# Foomka Ogolaanshaha

Ogolaanshaha Ka qayb qaadashada Guud ee bixinta diiwaannada arday ee loogu talagalay Iskaashigan la yeelanayo:

***Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020"- Tallaabooyinka Ballanta ee Xaafadda***

Bixinta macluumaadkani waxay ku saabsan tahay ardayda iyo qoysaska qaybta ka ah barnaamijyada taageerada waxbarashada iyo dhaqanka (sida kuwa ay bixiyaan Hay'ada Bulshada ee Muhaajirka iyo Qoxootiga (Immigrant and Refugee Community Organization), Latino Network, Metropolitan Family Service, Native American Youth iyo Self-Enhancement, Inc.) Waalidiinta/daryeelayaasha iyo ardaygooda waxaa lagu marti qaaday in ay dadka la wadaagaan diiwaannada waxbarasho sababtoo ah arday ayaa isqoray mid ka mid ah barnaamijyadan.

Waxaan jeclaan lahayn ogolaansho aan ku fiirinayno diiwaannada waxbarasho ilmaha/qofka dhalinyarada ah, oo laga yaabo in ay ka mid noqdaan Aqoonsiga arday#, heerka fasalka, diiwaanka imaanshaha dugsiga, darajooyinka casharka iyo celceliska heerka dhibcaha, xaaladda dhaqaale, dhibcaha imtixaanka la dejiyay/ la keenay, diiwaannada anshaxa iyo qalin jebinta. Waxaan ururinaynaa macluumaad badan sababtoo ah Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Degaanka Multnomah ayaa naga codsatay bixinta xog ku saabsan horumarka iyo guusha ay gaareen ardaydii ka qayb qaadatay barnaamijkii iskaashiga ururada ee Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020" ee ka dhacay dugsiyada soo socda: Dugsiga Hoose ee Earl Boyles, Dugsiga Hoose ee Mill Park, Dugsiga Dhexe ee Ron Russell, Dugsiga Sare ee David Douglas.

Waxaan eegi doonaa diiwaannada ardayga/ardayada inta lagu gudo jiro sanad dugsiyeedkan (2016-2017), labada sanad dugsiyeed ee soo socda (2017-2018 iyo 2018-2019), iyo sanadka la filayo in dugsiga sare laga qalin jebiyo. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aanu isticmaalno qalab kale sida ra'yi ururin si la iskugu soo ururiyo macluumaad dheeraad ah mustaqbalka. Diiwaanadan, iyo sidoo kale wax kasta oo waalidka ama arday noogu sheego ra'yi ururinta mustaqbalka, waxay noqon doonaan kuwo qarsoodi ah. Kaliya adeeg bixiyayaasha iyo qiimeeyayaasha qaybta ka ah daraasadan ayaa arki doona diiwaannada qof kasta iyo jawaabaha ra'yi ururinta. Cidna lama wadaagi doono wixii diiwaano ah ee wata magac qof ama macluumaadka shakhsi ee ay leeyihiin waalidka ama arday iyadoo aan lala wadaagayn macalimiinta, shaqaalaha dugsiga, ama waalidiinta kale.

Waxaan jeclaan lahayn in aan helno ogolaansho si aan dadka ula wadaagno sawirrada iyo cajaladaha fiidiyoowga ee ardayda iyo/ama waalidiinta/daryeelayaasha ka qayb qaatay barnaamijkii iskaashiga ururada ee Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020" ee ka dhacay dugsiyadani. Saxiixida la saxiixiyo ogolaanshahan, ardayga iyo waalidku labadooduba waxay fasaxayaan isla markaana ogolaanayaan in IRCO, Latino Network, Metropolitan Family Service, Native American Youth and Family Center, Self-Enhancement, Inc. iyo United Way of the Columbia-Willamette ay xaq u leeyihiin lahaanshaha sharci, daabacaadda, isticmaalka, gadida ama qoondeynta mid ka mid ah ama dhamaan sawirrada farshaxanka 'portraits' ama sawirrada caadiga ah, aflaanta, filimka, cajaladaha fiidiyoowga, iyo/ama codadka la duubo ee ay iga qaadeen ama iga sameeyeen taariikhdan hada la joogo iyo wixii ka dambeeya, ha ka duwanaato ama ha noqoto arrin la xiriirta sharaxaad ama qoraal daabacan, sheeko ama shay ku saabsan wararka, isticmaalka internet-ka, baahinta telefishanka/raadiyaha, ama daabacaad, xayaysiin ama ujeedo kasta oo kale oo sharci ah. Saxiixaaga (waalidka/daryeeluhu) wuxuu meesha ka saarayaa dhammaan sheegashooyinka magdhawga ee la xiriira isticmaalka isla markaana wuxuu meesha ka saarayaa wixii xuquuq ah ee lagu fiirinayo iyo/ama lagu ogolaanayo nuqulka xayaysiis la diyaariyay ee laga yaabo in la isticmaalo kaasi oo xiriir la leh sawirrada iyo cajaladaha fiidiyoowga ee waalidka ama ardayga ka muuqdaan. Haddii aadan ku raacsanayn sida uu u dhigan yahay hadalka ee ku aadan siinta sawirrada iyo cajaladaha fiidiyoowga la siinaya dadkan iskaashiga lala leeyahay, waxaad dooraan kartaa in aanad ka qayb qaadan adiga oo calaamadaynaya sanduuqa tilmaamaya in aan laga qayb qaadan oo ku qoran qaybta saxiixa ee foomkan oggolaanshaha.

Go'aankaaga ah in aad dadka la wadaagto diiwaannada qoyskaaga iyo sawirradu waa mid ikhtiyaari ah. Waxaad wakhti kasta dooran kartaa in aad joojiso wadaagista diiwaannada iyadoo aanay wax saamayn ah ku yeelan doonin xariirka waalidku ama qofka dhalinyarada ahi la leeyihiin ururka bulshada, dugsiga, United Way si ay qayb uga noqdaan barnaamijyada uu bixiyo ururkaaga bulshadu.

Haddii mid idinka mid ahi uu hayo wax su'aalo ah oo ku saabsan macluumaadkan la codsaday, Alejandro Queral ha kala xiriiro 503-226-9357.

OGOLAANSHAHA WAALIDKA: Saxiixida aad saxiixayso sanduuqa jaalaha ah ee hoosta ku yaala, waxaad sheegaysaa in aad fahamsan tahay macluumaadka kor ku qoran, in aad ogolaansho siinayso ilmaha/qofka dhalinyarada ah ee aad dhashay in uu diiwaannadiisa waxbarasho iyo adeeg la wadaago shaqaalaha barnaamijka iyo qiimeeyayaasha ka shaqaynaya mashruuca Qoysas Guulaysta 2020 “Successful Families 2020”-Tallaabooyinka Ballanta ee Xaafadda. Waxaad sidoo kale ku raacsan tahay bixinta ogolaanshaha iyo isdhaafsiga xogta ardayga/ardayada dhalinyarada ah oo ay ka mid yihiin magaca, Aqoonsiga#, heerka fasalka, dhibcaha imtixaanka la keenay, darajooyinka casharka iyo celceliska heerka dhibcaha, xaaladda qadada lacag la’aanta ah/hoos loo dhigay, xaaladda dhaqaale, xogta imaanshaha dugsiga, iyo xogta anshaxa ee ka dhaxaysa Dugsiga Degmada David Douglas, United Way of Columbia-Willamette, iyo shaqaalaha cilmi-baarista iyo qiimeynta ee ka shaqaynaya mashruucani.

| Magaca Waalidka/Daryeelaha (Daabacan) | Saxiixa Waalidka/Daryeelaha | Taariikhda |
|---|---|---|

Magaca Ardayga/Ardayada (Daabacan)

QIRITAANKA ARDAYGA: **Saxiixida aad saxiixayso sanduuqa jaalaha ah ee hoosta ku yaala, waxaad sheegaysaa in aad fahamsan tahay macluumaadka kor ku qoran.**

☐ *Fadlan calaamaddee haddii, arday ahaan, aad ka weyn tahay 18 jir.*

| Magaca Dugsiga | Saxiixa Ardayga/Ardayada | Taariikhda |
|---|---|---|

IN AAN LAGA QAYB QAADAN BIXINTA SAWIR/CAJALAD FIIDIYOO:

☐ *Fadlan calaamaddee sanduuqan haddii aad rabto in aadan ka qayb qaadan bixinta sawir/cajalad fiidiyoo.*

MAGACA TURJUBAANKA/ORG: **Saxiixida aad saxiixayso sanduuqa jaalaha ah ee hoosta ku yaala, waxaad xaqiijinaysaa in aad fahamsan tahay macluumaadka kor ku qoran si buuxda Waalidka iyo Ardayda loogu sharaxay luqad ay fahmi karaan isla markaana laha jawaabay su’aalahoogii.**

| Magaca Turjubaanka, Urrurka | Saxiixa Turjubaanka | Taariikhda |
|---|---|---|